

# Codsadayaasha Ilaalinta Caalamiga ah

## Qeybta Guudmarka

Bangiga Ireland, waxaan ku faaneynaa in kobcino badqabka maaliyadeed ee dhammaan macaamiisheenna. Badqabka maaliyadeed waxaa xudun dhexaad u ah ka mid noqoshada maaliyadeed taasna macnaheedu waa in dhamaan macaamiisha ay heli karaan adeegyada aasaasiga ah ee bangiga. Waxaan caawinaad dadka codsanaya ilaalinta caalamiga ah annagoo fursad u siinayna inay fahmaan adeegyada bangiga iyo annagoo aqoonsanayna baahida loo qabo adeegyada tarjumaadda si loo xaqiijiyo inay helaan taagerooyinka adeegyada maaliyadeed ee ay u baahan yihiin.

Waxaan haynaa laba adeeg oo loogu talagalay baahida bangiga ee maalinlaha kuwaas oo laga yaabo inay ku habboon yihiin dadka codsanaya ilaalinta caalamiga ah; akoonka shaqsiyeed ee dhaqdhaqaaqa leh iyo akoonka aasaasiga ah ee bangiga, labaduba waxay ku siinayaan meel aamin ah oo aad ku xafidato kuna isticmaasho lacagtaada. Faahfaahinta mid kasta oo ka mid ah akoonadan iyo liistada dukumiintiyada loo baahan yahay si loo furto akoonadan yaa la bixiyaa.

Markaad diyaarsato dukumintiyada lagaa rabo waxaad imaan kartaa laan kasta oo ka mid ah Bangiga Ireland waxaanan bilaabi karnaa sidii laguugu samayn lahaa akoon cusub.

Waxaan fahamsanahay in macaamiisha qaarkood aysan laheyn wax xirfado luuqada Ingiriisiga ah ama ay dareemi karaan in xirfadahooda luuqadda Ingiriisiga aysan ku filneyn si ay awood ugu yeeshaan inay ka jawaabaan su'aalaha inta ay joogaan laanta bangiga. Haddii arrintaasi ay ku haysato, waxaan ku farxaynaa inaad soo kaxaysato saaxiib, qof asxaabtaada ka mid ah ama turjubaan kaas oo kuu turjumi kara.

Intaas waxaa sii dheer, dhowr ka mid ah shaqaalaha Bangiga Ireland waxay ku hadlaan luuqado dhowr ah waxaanan ku faraxsanahay inaan isku dayno inaan ku caawino haddii aadan haysan qof kuu turjuma oo aad soo kaxaysan karto. Kaliya waxaad weydiisaa la-taliyaha Laangta Bangiga kugu soo dhoweynaya.

Waxaad faahfaahinta ku saabsan laamaheenna ka heli kartaa halkan <https://www.bankofireland.com/branch-locator/>